

Barashada luqada norwejiga

Oslo waxa jira fursado badan oo ay ka faa'iidayaan karto cidda doonaysa in ay luqada barato. Koorsooyinka norwejiga qaar ka mid ah waa luqo keliya, qaarna waa luqo iyo tababarasho shaqo oo isku jira. Waxa kale oo jira koorsooyin u gaar ah dhallinyarada iyo kuwo u gaar ah haweenka. Koorsooyinka qaar ka mid ah ayaa leh fursado carruurta laguugu ilaalinayo inta aad fasalka ku jirto. Koorsooyinka norwejigu waxay ka jiraan meelo badan oo Oslo ka mid ah, waana suuragal in la dhigto gelinka hore ama gelinka dambe.

Dhammaan dadka ku haysta ogolaansho joogitaan oo ka badan saddex bilood Norway waxa ay xaq u leeyihiin barasho luqo oo lacag la'aan ah. Arrintani ma khusayso dadka dalxiiska ah iyo qaxootiga. Qaar ka mid ah koorsooyinka ayaa loogu talagalay dadka leh waxbarasho hore oo badan. Kuwo kalena waxa loogu talagalay dadka leh waxbarasho yar ama aan lahaynba waxbarasho hore. Waxa kale oo jira fasallo gaar ah oo loogu talagalay dadka aan akhriyi karin qorina karin xarfaha "latin" ka.

Haddii aad boos ka hesho koorso, waxa aad fasal la gelayaa dad leh waxbarasho hore oo ku dhow dhow taada oo kale. Codsiga in aad hesho barashada luqada oo lacag la'aan ah waxa aad u gudbinaysaa xarunta waxbaridda dadka waaweyn ee "Rosenhof". Bandhig buuxa oo ku saabsan koorsooyinka kala duwan ee Oslo iyo cinwaada waxa aad ka heli kartaa qaybta norwejiga iyo ingiriisida ee boggan "velkommenoslo.no".

Xirfad samaysad

Dad badan oo ka mid ah qaxootiga iyo ajnebiga kale ee yimaadda Norway ayaa waxay u baahan yihiin caawimo sidii ay u heli lahaayeen shaqo ku habboon, ama sidii ay u ogaan lahaayeen fursadaha shaqo ee jira. Koorsooyinka kugu caawinaya sidii aad u heli lahayd shaqo ama waxbarasho ayaa loogu yeedhaa koorsooyinka xirfad samaysadka. Waxa jira meelo badan oo dadka u fidiya koorsooyinka xirfad samaysadka sida xafiiska shaqada, xarunta "Rosenhof", "AOF Oslo" iyo kuwa kale oo badan. Cinwaanada meelahan waxad ka heli kartaa qaybta norwejiga iyo ingiriisiga ee boggan. www.velkommenoslo.no.

